



# Goorma ayaa shaqada la iga eryi karaa?

## “Shaqeynta ikhtiyaarka ah”

When Can I Be Fired? - “At-Will Employment”

Qolada shaqadu markii ay rabaan ayey shaqada **kaaga eryi karaan sabab kasta** adiguna markii aad rabto ayaad shaqada iskaa uga tagi kartaa. Arrintan waxaa k la yiraa “Shaqeynta Ikhtiyaarka ah.” **Cid laga reebaa ma jirto xeerka ikhtiyaar shaqada ah.**

### Dad-kala-soocid

Waa sharci darro in qolo shaqadu shaqada kaaga eryaan arrimo ku salaysan dad kala soocid sharci darro ah. Waa dad kala soocid sharci darro ah kolka qolo shaqo bixisaa ay shaqada kaaga erido iyadoo sababtu tahay arrimo ku salaysan:

- Da’da
- Guur
- Qoys xaaladii
- Lab ama Dhadig
- La Galmoodka Raga/ dumarka
- Jinsiyad
- Qoomiyada loo dhashay
- Midab
- Jinsiyada la yahay (laakiin waxa ay ku waydiisan karaan sharcigaaga deganaanshaha wadanka)
- Cayr qaadasho
- Naafanimo
- Diin
- Caqiido



Ka eeg waraqada war-gelinta ee [Dad kala sooca iyo Khashkhashaadaha Shaqada ka dhaca](#).

### Xaquuqda Qandaraasku uu u leeyahay Shaqada

Hadii aad haysato qandaraas shaqo, qolo shaqadu ma aha in ay ku erido hadii aadan jabin qandaraaska. Qandaraaska waxa uu noqon karaa:

- Qandaraas shaqo
- Balan qaad afka ah
- Warqad shaqo ugu baaqid ah oo shaqada ka horeeysa
- Heshiiska gorgortanka ah ee ururada shaqaalaha iyo qoladu shaqadu wada galaan

Xataa hadii aad haysato mid ka mid ah kuwa kor ku xusan, macnaheedu ma aha in qolada aad u shaqeysaa aysan **abadan** marna ku eryi karin. Inta badan, qandaraasyadu ama buugta gacantu waxa ay sheegaan waxyaabaha shaqada lagaaga eryi karo iyo talaabooyinka qolada shaqada khasabka ku ah inay qaado ka hor inta aysan ku eryin. La hadal qareen hadii aadan hubin xaquuqdaadu waxa ay tahay.

Hadii aad urur shaqaale ka tirsan tahay, waxa aad leedaahay qandaraas shaqo oo la yiraa heshiiska gorgortanka wadarta. Waana heshiis u dhaxeeya qolada shaqada iyo ururka shaqaalaha. Heshiiskaasi waxa uu fari karaa qolada shaqadu inay cadeeyaan 'sabab xaq' ah oo ay ku ciqaabi karaan ama ku eri karaan qofka shaqaalaha ah. Eeg qandaraaskaaga lana hadal wakiilka ururka shaqaalaha ee goobtaada shaqada hadii aad qabto su'aalo ah oo arrintan ah.

### Ilaalinta “Runta soo sheegaha” iyo ka hor taga Aar-goosiga

Mar marka qaarkood, sharciga ayaa ku ilaalin kara hadii shaqo lagaaga eryo iyadoo sababtu tahay difaacid xaquuqdaada aad difaacday ama waxa aad diiday in aad jabiso sharciga adigoo shaqo ku jira. Ma aha in lagu ganaaxo ama laguugu hanjabo sameynta aad sameyso arrimaha caynkaa ah. Arrintan waxaa loogu yeeraa ilaalinta “run soo sheegaha” iyo ka hor taga aar-goosiga. Sharcigu waa uu ku difaacayaa hadii:

- Aad u soo sheegto ‘si daacadnimo ah’ jabin la jabiyeey sharci dowlada ama kan qolada shaqada. “Si daacadnimo ah waxaa laga wadaa in aad dhabtii **rumeysan** tahay in waxa aad soo sheegaysaa ay run yihiin ayna sharci darro yihiin. Laakiin hadii ay shaqadaadu tahay inaad soo sheegto sharci jabinaha, waxaa laga yaabaa in aadan sheegan karin xaq dadka sharci jabinta soo sheega ay leeyihiin.
- Aad u sheegato ashtakooto qolada shaqada ku saabsan xaquuqdaada. Qolada aad u shaqeysaa kuma eryo karto si ay kaaga aarsato (aar gudasho) waayo waxa aad difaacday xaquuqdaada. Waxaa lagu ogol yahay in aad sameyso arrimaha sida sheegashada in dad kala soocid lagu sameeyey ama aad codsatay in lagu caawiyo waayo waxaa tahay hooyo ilmo naas u dhigaysa ama qof naafo ah.
- Ay hay'ad dowladu leedahay kaa codsatay in aad ka qayb gasho baaritaan ama dacwo
- Aad diiday in aad ku sameyso wax sharci darro ah shaqada aadna u sheegtay taa shaqada



Sharciyada arintani waa adkaan karaan. Wac qareen ama la hadal Wasaarada Minnesota ee Shaqada iyo Warshadaha (651) 284-5005 ama 1-(800) 342-5354. Gal [www.doli.state.mn.us/](http://www.doli.state.mn.us/).

## Dhowritaanada kale

Maha in shaqada lagaaga eryo:

- In lacag jeegaaga laga gooyo
- In gargaarka ilmaha jeegaaga laga gooyo
- Fasaxyada sharcigu ogol yahay waa loo qaadan karaa. Sida uurka ama fasaxa waalidka, xanuun adiga ku hela, ilmahaaga ama qaraabada kale, gacan qaadka qoyska dhexdiisa ah iyo fasaxyada kale. Khasab ma aha in lacagi kuu socoto. Haddii uu baahato fasaxan, kala hadal qolada shaqada si aad u aragto in aad qaadan karto fasaxyadaa.


Ka eeg waraqadayada war-gelinta ee:

[Time off from Work: Birth, Adoption, School Events](#)

[Time off from Work: Illness or Death](#)

[Time off from Work: Family in the Military](#)

[Employment Rights: Victims of Violence and Harassment](#)



Haddii aad shaqada lagaa eryo ama aad ka tagto iyadoo sababtu tahay mid ka mid ah kuwa kore oo dhacay awgeed, u sheeg qolada shaqada waxa dhacay iyo inaysan waxaasi sax ahayn. Haddii aysan waxba ka qaban dhibaataada, waxaad heli kartaa lacagta shaqaalaha baaga-muudada ah la siiyo. Ka eeg warqadayada war-gelinta shabakada ee [Unemployment Benefits](#). Waxaa kaloo dhici karta in shaqadii lagugu celiyo ama aad dacawooto. Waco qareen qaabilsan shaqooyinka.

**Waraqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.**

© 2020 Minnesota Legal Services Coalition. **Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixi aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo isticmaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.**